



Tallaalka

Si loo helo lacag-bixinta qoyska ee loogu talagalay ilmaha ka yar da'da 20 sano, waxaad u baahan tahay inaad hubiso in tallaalkoodu u dhammaystiran yahay.

Waa maxay lacag-bixinnada ay saamaynayso?

- Child Care Benefit
- Child Care Rebate, iyo
- Family Tax Benefit Part A supplement

Isbaddelladan waxay kaloo saameeyaan macaamiisha kuwaas oo codsada, Grandparent Child Care Benefit, Special Child Care Benefit ama Jobs, Education and Training Child Care Fee Assistance.

Maxaa loo tallaalaa?

Tallaalku wuxuu ka dhigaa adiga iyo carruurtaada kuwo caafimaad qaba oo ammaan ka ah cudurada waxyeellada leh. Waa wax fudud, ammaan ah oo waxtar leh.

Maxaan u baahanahay inaan samayno?

Si loo daboolo shuruudaha tallaalka, ilmahaagu wuxuu u baahan yahay inay:

- U-dhan tahay tallaalada carruurnimada hore, ama
- Haysto ka-dhaafid caafimaad.

Waxaan hubin doonaa in faahfaahinta tallaalka ee ilmahaaga oo ku taal diiwaanka Australian Immunisation Register ayadoo la adeegsanayo faahfaahinta Medicare-kaaga.

Carruurta aan xaqa u lahayn in laga diiwaangeliyo Medicare waxaa lagu dari doonaa diiwaanka Immunisation Register markii tallaalka-bixiyaha (oo ay ku jiraan dhaqtarka guud) u diro faahfaahinta tallaalka diiwaanka Australian Immunisation Register.

Kala hadal dhaqtarkaaga guud haddii ay jirto sabab caafimaad oo ilmahaaga aan loo tallaali karin.

Sidee baan ku ogaanayaa haddii ilmahaaga ay u-dhan tahay tallaalkooda?

Waxaad hubin kartaa caddaynta sooyaalka tallaalka ilmahaaga adigoo adeegsanaya:

- akoonka online-ka ee Medicare-kaaga ayadoo la marayo myGov. Haddii aadan lahayn akoonka myGov, samayso mid waxaadna ku xirtaa akoonkaaga online-ka Medicare-kaaga.

- mobile-ka app. ee Express Plus Medicare. Haddii aadan haysan app, ka-soo-degso App Store, Google Play™ waxaad doorataa aaladaha mobile-ka iyo desktoobyada Windows 10.

Shaqsiyaadka jira da'da 14 sano iyo ka-weyn waxay heli karaan caddaynta sooyaalka tallaalkooda:

- ayadoo la adeegsanayo ama la abuurayo akoonkooda online-ka ah ee Medicare ayagoo u-maraya myGov
- ayadoo la adeegsanayo mobile-ka app ee Express Plus Medicare ama
- ayadoo la waco **1800 653 809**.

Haddii uu jiro macluumaadka ka maqan caddaynta sooyaalka tallaalka ilmahaaga, ka codso tallaalka-bixiyahaaga inuu u diro macluumaadkaas diiwaanka Australian Immunisation Register.

Tallaalada waddanka dibaddiisa

Haddii uu ilmahaagu tallaalo ku soo-qaatay waddanka dibadiisa, u-keen caddaynta tallaalkaadaas tallaalka-bixiyahaaga Australia. Waxay hubin doonaan in ilmahaagu qaatay tallaalkadii saxda ahaa si uu u kaafiyo jadwalka Australian National Immunisation Program Schedule.

Haddii uu ilmahaagu kaafiyey jadwalka National Immunisation Program Schedule, tallaalka-bixiyahaaga Australia ayaa la-socodsiiin doona diiwaanka Australian Immunisation Register.

Haddii uusan ilmahaagu kaafin jadwalka National Immunisation Program Schedule, tallaalka-bixiyahaaga ayaa ku talin doona in la sameeyo tallaalka jadwalka ee la-qabsashada ah

Haddii aad dhawaanta timid Australia aadna u baahan tahay in la turjumo caddaynta tallaalka ilmahaaga, waxaad ka aqrisaa wax badan oo ku saabsan [Free Translating Service](#) oo ku yaallaa website-ka Department of Social Services.

Australian Immunisation Register

Diiwaanka Australian Immunisation Register waa diiwaanka qaranka kaas oo diinwaangeliya tallaalka la-siiyey dadka da' walba ah ee Australia. Diiwaanka wuxuu qorayaa tallaalka lagu qaatay ayadoo la marayo dhaqaatiirta guud iyo rugaha caafimaadka ee bulshada.

Si atoomatik ah ayey ugu darayaan carruurta ku qoran Medicare diiwaanka Australian Immunisation Register.

Waxaan carruurta kuwaas oo aan xaq u lahayn in lagu qoro Medicare ku dari doonaa diiwaanka Australian Immunisation Register markii tallaalka-bixiyuhu (oo uu ku jiro dhaqtarka guud) u diro faahfaahinta tallaalka diiwaanka Australian Immunisation Register.

Wixii macluumaad dheeraad ah

- ka eeg humanservices.gov.au/air wixii macluumaad dheeraad ah oo ku qoran Ingiriisi
- ka eeg humanservices.gov.au/yourlanguage halkii aad ka aqrin karto, dhagaysan karto ama aad ka daawan karto fiidiyowayada ay ku jiraan macluumaadka ku qoran luqaddaada
- wac **131 202** si aad noogula hadasho luqaddaada wax ku saabsan lacag-bixinnada iyo adeegyada Centrelink
- ka wac Translating and Interpreting Service (TIS National) taleefanka **131 450** si aad noogula hadasho luqaddaada wax ku saabsan lacag-bixinnada iyo adeegyada Medicare iyo Child Support
- ka eeg xarruunta adeegga.

Ogsoonow: wicitaannada laga sameeyo taleefanka gurigaaga ee lambarada '13' oo laga waco meel kasta oo Australia ah waxaa laga qaadaa qiyaas lacageed go'an. Qiyaastaas way ku kala duwanaan kartaa qiimaha wicitaanka degaanka waxay kaloo ukala duwanaan kartaa adeeg-bixiyeyaasha taleefanada. Wicitaannada lambarada '1800' oo laga waco taleefanka gurigaaga waa lacag la'aan. Wicitaanada laga sameeyo taleefanada dadweynaha iyo kuwa moobaylka waqti ayey ku socdaan waxaana laga qaadaa qiyaas lacageed sare.

Afeef

Macluumaadka halkaan ku qoran waxaa looga-jeedaa oo keliya tuse ahaan kaas oo ku saabsan lacag-bixinnada iyo adeegyada. Waa masuuliyadaada inaad go'aan ka gaarto haddii aad doonayso inaad samayso dalab wixii la xiriira xaalladahaaga gaarkaa.



Immunisation

To get a family payment for a child under 20 years of age, you need to make sure their immunisations are up to date.

What payments are affected?

- Child Care Benefit
- Child Care Rebate, and
- Family Tax Benefit Part A supplement

These changes will also affect customers who claim Grandparent Child Care Benefit, Special Child Care Benefit or Jobs, Education and Training Child Care Fee Assistance.

Why immunise?

Immunisation keeps you and your children healthy and safe from harmful diseases. It's simple, safe and effective.

What do I need to do?

To meet the immunisation requirements, your child needs to:

- be up to date with their early childhood immunisations, or
- have a medical exemption.

We'll check your child's immunisation details on the Australian Immunisation Register using their Medicare details.

Children who aren't eligible to enrol in Medicare will be added to the Immunisation Register when a vaccination provider (including a general practitioner) sends the details of a vaccination to the Australian Immunisation Register.

Talk to your general practitioner if there's a medical reason why your child can't be vaccinated.

How do I know if my child is up to date with their immunisations?

You can check your child's immunisation history statement using:

- your Medicare online account through myGov. If you don't have a myGov account, create one and link it to your Medicare online account
- the Express Plus Medicare mobile app. If you don't have the app, download it from the App Store, Google Play™ and selected Windows 10 mobile devices and desktops.

Individuals 14 years of age or older can access their immunisation history statement:

- using or creating their own Medicare online account through myGov
- using the Express Plus Medicare mobile app or
- calling **1800 653 809**.

If there's information missing from your child's immunisation history statement, ask your vaccination provider to send it to the Australian Immunisation Register.

Overseas vaccinations

If your child received vaccinations overseas, take proof of these to your Australian vaccination provider. They'll check your child has been given the correct vaccinations to meet the Australian National Immunisation Program Schedule.

If your child has met the National Immunisation Program Schedule, your Australian vaccination provider will update the Australian Immunisation Register.

If your child doesn't meet the National Immunisation Program Schedule, the vaccination provider will recommend a catch up schedule of vaccinations.

If you've recently arrived in Australia and need your child's immunisation evidence translated, read more about the [Free Translating Service](#) on the Department of Social Services website.

Australian Immunisation Register

The Australian Immunisation Register is a national register that records vaccinations given to people of all ages in Australia. The register records vaccinations given through general practices and community clinics.

We will automatically include children enrolled in Medicare on the Australian Immunisation Register.

We will add children who aren't eligible to enrol in Medicare to the Immunisation Register when a vaccination provider (including a general practitioner) sends the details of a vaccination to the Australian Immunisation Register.

For more information

- go to humanservices.gov.au/air for more information in English
- go to humanservices.gov.au/yourlanguage where you can read, listen to or watch videos with information in your language
- call **131 202** to speak with us in your language about Centrelink payments and services
- call the Translating and Interpreting Service (TIS National) on **131 450** to speak with us in your language about Medicare and Child Support payments and services
- visit a service centre.

Note: calls from your home phone to '13' numbers from anywhere in Australia are charged at a fixed rate. That rate may vary from the price of a local call and may also vary between telephone service providers. Calls to '1800' numbers from your home phone are free. Calls from public and mobile phones may be timed and charged at a higher rate.

Disclaimer

The information contained in this publication is intended only as a guide to payments and services. It's your responsibility to decide if you wish to apply for a payment and to make an application with regard to your particular circumstances.